TAXANAHA DHAXALREEB I/2015


Feeberwari 2015 Ponte Invisibile Ed.

Gorfeyn Riwaayadeed: *Aqoon iyo Afgarad* waa murti ku habboon in maanta la isu sheego.

@SOMALIBOOKS

.... laba farriimood oo isbarbar socda, oo aan is haysannin, oo midi sheeggan tahay midina sheelan tahay.

Jaamac Muuse Jaamac



PONTE INVISIBILE

Buug elegtrooniggan an waxa soo saarey Ponte Invisbile iyo Seeska Hiddaha iyo Dhaqanka ee “Redsea”.
Waxa lagu daabacay Hargeysa, Somaliland. Daabacaddii Kowaad, Feeberwari, 2015.

Taxanaha Dhaxalreeb:

[1] Jama Musse Jama, Juun 2005
Layli Robot: Makiinad iswadda oo ciyaarta Layli Goobalay
[2] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' iyo Mohamoud H. Nugidoon, Noofember 2005
Qalabka iyo Suugaanta Qodaalka.
[3] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Diisember 2005
Mahadhadii Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal.
[4] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Jeenarweri 2006
Kumaa ah Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed: ma Carraale mise Gaarriye?
[5] Jama Musse Jama, Abriil 2007
Tirada iyo habka tirsiimo ee Afsoomaaliga.
[6] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Meey 2007
Miisaanku waa furaha kala asooridda badaha maansooyinka soomaaliyeed
[7] Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd", Juun 2007
"Dhulgariir" waa digniin culus
[8] Khaalid Jaamac Qodax, Oktoober 2007
Suugaan Xul ah iyo Abwaan Axmed Aw-geedi "Dheeraad"
Maansoyahan mudh baxay!
[9] Xasan C. Madar, Maarj 2008
Raad ka mid ah raadadkii addoonsiga.
[10] Aadam Xaaji Cali Axmed, Seebtember 2008
Bandhig-buugeedka Caalamiga ah ee Hargeysa
[11] Ayaan Maxamuud Cashuur, Oktoober 2008
Toddobaadka Fanka iyo Suugaanta Soomaalida ee Landhan
[12] Xasan C. Madar, Diisember 2008
Ruwaanda: Xasuuqii boqolka maalmood
[13] Mohamed-Rashiid Sheikh Hassan, Diisember 2008
Art and Literature: The Other Weapon for Resistance
[14] Kamaal Cabdillaahi Xuseen, Abriil 2009
Iskaddaa sonkorta oo ka gaashaamo cudurka kaadi-macaanka noociisa labaad
[15] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Noofember 2009
Aqoontii iyo ibaxnimadii Soomaalida
[16] Mohamed Obsiye, December 2010
Somaliland's Search for Recognition
[17] Jama Musse Jama, May 2012
We lost a friend
[18] Jama Musse Jama, Feeberwari 2015
Aqoon iyo Afgarad waa murti ku habboon in maanta la isu sheego: Gorfeyn riwaayadeed

@SOMALIBOOKS

Taxanaha Dhaxalreeb waa qoraallo kusoo baxa degalka redsea-online.com dhowr jeer si aan aan joogto ahayn sannadkii. Waxa isku dubbarida Jaamac Muuse Jaamac, waxana daabaca soo saarha Ponte Invisbile Ed. oo deggan Pisa, Italy.

Ka rogo si bilaash ah www.redsea-online.com/e-books.

Gorfeyn riwaayadeed[i]: *Aqoon iyo Afgarad* waa murti ku habboon in maanta la isu sheego

Jaamac Muuse Jaamac

@SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Alifkii qaldamaa,

Alboqruu ku dhibaaye,

Siday iila egtayna,

Asaraarkan dhexdeenniyo,

Taladaan ebyi waynay,

Waxa keenay ammuurta,

Aqooni wayska halkeeda,

Afgarad baase la waayey.

"Aqoon iyo Afgarad", 1972

@SOMALIBOOKS

Tusmo

1. Hordhac …. 7
2. Bandhigga riwaayadda …. 9
3. Ubucda riwaayadda …. 11
4. Xaaladda maanta iyo isafgaranwaaga …. 15
5. Farriinta kale ee ka soo baxday *Aqoon iyo Afgarad* …. 16
   5.1 Ka digista sheekh beenaalayaasha dadka beenta ku daweeya …. 22
   5.2 Ku tagrifalka xoolaha dadwayne …. 23
   5.3 Muhiimmadda waxbarashada hablaha iyo guud ahaan xaqa haweenka …. 24
   5.4 In haddii la dayaco garsoorka, xaqsoorku dhimanayo …. 24
6. Gebagabo …. 31
7. Dabadhah: Heesaha ku jira *Aqoon iyo Afgarad* oo tifatiran …. 32
   7.1. Saxarla' …. 33
   7.2. Gudcur aan caddaba jirin …. 37
   7.3. Maxay dhaqasho ii tahay …. 39
   7.4. Axmed Gurey ma uu dhiman …. 41
   7.5. Walaac anigoo ku seexday …. 44
   7.6. Allahayow nin daacad ah …. 48
   7.7. Mudantii Haweenka …. 52
   7.8. Heestii dhinnayd …. 56
2. Tixraac …. 57

@SOMALIBOOKS

1. HORDHAC

1972kii koox xilligaaba hormuud ka ahayd carinta maskaxda dadwaynaha, kuna sugnayd Kulliyaddii Waxbarashada ee Lafoole, ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, ayaa curisey riwaayad wax wayn ka beddeshay habkii masrixiyadda loo dhigi jirey[ii]. Riwaayaddaasi waxa ay ahayd *Aqoon iyo Afgarad*, waxana wada allifey Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi", Siciid Saalax Axmed iyo, Alle ha u naxariistee, Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye" iyo Muuse Cabdi Cilmi "Muuse Gadhle"[iii]. Qorayaasha riwaayaddu waxa ay ahaayeen masrixiyiintii ugu horreeyey ee aqoontoodu ay gaadhsiisnayd heer jaamacadeed[iv]. Kulliyaddaa Lafoole, gaar ahaan xilligaa, waxa ka samaysamay fikirsuugaaneed ilaa maanta saamayn wayn ku leh suugaanta Soomaaliyeed. *Aqoon iyo Afgarad* waxa ay ka curatay fikirfaneedkaas, waxana ay curiyeyaashu sheegeen in faafreeb xad dhaaf ah la mariyey, oo culays badani ka qabsaday sidii ay uga dhaadhicin lahaayeen dawladda in loo soo bandhigo dadwaynaha[v].

Farriimaha is huwan ee ay riwaayaddaasi siddey waa kuwo loo baahan yahay in mar kale la isu sheego maanta. Farriinta kowaad waa midda ay qorayaashu sheegeen, oo ku saabsanayd is-afagaranwaaga ka taagnaa bulshada dhexdeeda, oo ay sababtiisa ugu wayni ahayd aqoonyahankii dalka ku soo laabtay oo la yimi kala duwanaansho af, afkaar, hab-nololeed iyo fikir dhaqan-dhaqaale oo ay ka soo rarteen waddamadii kala duwanaa ee ay wax ku soo kala barteen. Dhibaatada ugu horreysay waxa ay ahayd in ay iyagu is afgartaan inta aanay qaranka wax u tarin. Eeddu ma ay ahayn dadka debedda wax ku soo bartay oo kaliya e, waxa ay riwaayaddu gujinaysay, sida ay ka sinnaayeen mufakiriintii sannadahaasi u kacay Afrika oo dhammiba, in gumaysigu kaga tagay dalka maamulkiisa, dad uu sii tababartay si ay u sii wadaan afkaartiisa[vi]. Iyaga qudhooda waxa ka dhextaagnaa is-afgaranwaa ay riwaayaddu sheegaysay oo dhaqankii Ingiriisku ka tagay ee maamul iyo kii Talyaanigu ka tagay, gaar ahaan, in ay is jiidhsanaayeen, ayaa riwaayadda laga dhadhansanayay. Riwaayaddu waxa ay ahayd iska-dhicin Afka Soomaaligu iskaga caabbinayo loolanka ka dhexeeya afafka iyo dhaqammada Reer Galbeedka, gaar ahaan Ingiriiska iyo Talyaaniga[vii] oo hore u kala jiidanayay habka waxbarashada dalalkay gumaysteen, iyo Maraykanka oo markaa uun ku cusbaa faragalinta habka waxbarashada Soomaalida[viii], iyo waliba kan Jaamacadda Carabta[ix] oo isna doonayay in uu bannaysto meel uu ka soo galo manhajka waxbarasho. Loollankaas oo ay indheergaradku u arkayaan in uu meesha ka saarayo ahaanshihii Soomaalinnimo ee bulshadu u baahnayd markaa[x]. Sidaa daraaddeed farriinta is-afgaranwaaga ee riwaayaddu way ka shisheysey dhallinyarada wax ku soo baratay debedaha oo midkoodba la yimi dhaqankii dalka lagu soo tababarray.

Farriinta labaad ee aan la sheegin waxa ay ahayd tan keentay saamayntii ay midhaha suugaanaysan ee riwaayaddu, gaar ahaan maansooyinka jiiftada u badan ee la codeeyey, ay ku yeesheen bulshada dhexdeeda. Waxa aynu ognahay in ay kiciyeen muran iyo fikirro siyaasadeed oo iska soo horjeeda, kuwaas oo salka ku haya sidii loo turjumey midhahaasi, iyo waliba doodihii ka dhashay suugaantaas. Doodahaasi waxa ugu

@SOMALIBOOKS

caansanayd silsiladdii Siinley[xi] ee ka bilaabantay jawaabtii uu Cabdi Aadan Xayd "Qays"[xii] ka celiyey hees ka mid ah heesaha *"Aqoon iyo Afgarad"* oo Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi" sameeyey. Siinley inta la ogtayay waxa ka qayb galay 29 maanso oo ay soo tiriyeen 15 maanosoyahan[xiii]. Gorfeyntan waxa aynu ku ogaan doonnaa sababta aan riwaayadda marka hore looga dhadhansan farriimahan siyaasadeed ee riddada dheer ee ay siddo; iyo sida aad u mooddo in is-haysashada masrixiyaddu ay u *dabacsantahay*, oo mararka qaarkood aad moodayso in aanay wada socon heesaha qaarkood iyo riwaayadda sheekadeedu[xiv]. Ugu danbayn waxa aynu xusaynaa sida ay tirinta suugaanta ee xilligaa bilaabantay, ee gaar ahaan ku qotonta godka jiiftadu, ay u saamaysay curinta suugaanta dhallinyarada ee ilaa maanta la dhadhansan karo; saamayntaas oo beddeshay filashadii soo jireenka ahayd, ee odhanaysay in suugaan qiime leh lagu sheegi karo uun gabay iyo godadka kale ee ka ad-adag jiiftada.

Bandhigga Caalamiga ah ee Buugaagta Hargeysa[xv], waxa sannadkii 2013 u ahaa halkudheg "Socdaal", waxana marti u ahaa Siciid Saalax Axmed oo Bandhiggu u dabbaaldagayay 50 sannadood oo uu si joogto ah uga ahaa bare heerarka kala duwan ee aqoonta oo uu meelo kala duwan wax ku dhigayay[xvi]. Waxa kale oo Bandhigga marti joogto ah u ah isna Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi". Bandhiggu waxa uu hoosta ka xarriiqayey in *Aqoon iyo Afgarad* iyo qorayaasheedu ay soo mareen socdaal dheer, iyada oo 40 sannadood ka dib, farriimihii ay siddey riwaayaddu, ay maanta taagan yihiin. Waxa sidaa darteed lagu soo qaatey mawduucyada Bandhigga Caalamiga ah ee Buugaagta Hargeysa iyo hadalwadaagga Buugaagta Wareegtaba[xvii], qiimaha ay maanta ku fadhido riwaayaddaasi, suugaan ahaan, iyo taagnaanta maanta ee farriimaha ay siddey markaa ay wali joogto yihiin. Qoraalkan waxa aynu ku eegi doonnaa gorfeyn ku saabsan farriimaha riwaayadda. Waxa soo socda buug uu qorey Siciid Saalax Axmed, oo uu iskudubbaridey Boodheri Warsame[xviii], oo si ka qoto dheer gorfeynta uga hadlaya riwaayadda *Aqoon iyo Afgarad*.

@SOMALIBOOKS

2. BANDHIGGA RIWAAYADDA

Magaca riwaayaddu waxa uu ahaa *"Aqooni waa iska halkeedee, Afgarad baa ka horreeya"*, hase yeeshee markii dib loo qorey, si dugsiyada loogu dhigo, waxa loo soo gaabiyey, oo ay ku caan noqotey *"Aqoon iyo Afgarad"*. Dulucda sheekadu waxa ay ku salaysan tahay in marka hore la is afgarto. Fariinta riwaayaddu waxa ay odhanaysay in afkaar iyo afaf aad u kala duwan la isula yimaaddo, iyada oo aan la is fahmayn, oo haddana la doono in qaran kaliya la wada dhistaa, waa mid aan suurogal ahayn. Maxamed Muuse Saxar[xix] oo hordhac u sameeyey riwaayadda markii buug loo rogey ayaa qorey "*Aqoon iyo Afgarad waxay qayaxday afkaarta iyo afafka kala geddisan ee ay la soo laabteen aqoonyahan[n]ada Soomaaliyeed ka dib markay dalal dhowr ah oo Yurub u badan wax ku soo barteen. Waxay Riwaayaddani inna tusaysaa in tacliinta ay aqoonyahannadaasi soo barteen ay ahayd mid ku salaysan deegaan qalaad, manhajyo kala duwan, cimilooyin ka geddisan tan xoolaha iyo beeraha dalku ku dhaqmi karaan. Sidaa awgeedna aanay waxba kordhin karin waxay dhimaan mooyee. Taasi waxay marag u tahay in Aqoon iyo Afgarad ay dhiirigelinayso deegaameynta Waxbarashada.*" Ereyga furaha u ah faalladan, iyo farriinta hore ee riwaayaddaba, waa "degaamaynta" waxbarashada[xx].

Ubucda jiliddu waa reer sabool ah oo ka kooban aabbaha (Raage), hooyada (Saaqa), gabadh (Dulmar) iyo wiil (Deyr) ay dhaleen. Waxa soo raaca wiil yar oo gabadhu ku curatay, oo la yidhaahdo Dibjir, iyo dhowr indheergarato ah (Ducaale, Dalmar, Deeqsi iyo Caalin) oo dalka dibaddiisa iyo gudihiisaba jooga. Wehel, Waaberi iyo Warsame waa ardeyda uu Caalin wax u dhigo. Dahsoon waa astaanta gobannimada. Daallin waa sarkaal dawladda ka tirsan. Suufi Bullaale waa wadaad-xume saarka tuma, Haatuf iyo Durraanna waa cod aan la arkayn cidda odhanaysa iyo cawil reerka u maqan, sida ay u kala horreeyaan.

Sheekada qaybeheeda hore waxa ay sheegaysaa darxumada ka muuqata astaanta gobannimada, iyo dayaca ku xeeran reerka oo waliba la caddeeyey awoodda dhaqaale ee qoyska oo curyaansan, heerka garaadkiisa oo aad u hooseeya. Waxa ay qaybtani tusaysaa daawadaha xilliga oo aad u xun oo xoolaha iyo beeruhu abaarsadeen iyo astaantii gobannimo oo curdin-dhadhay, indha la' oo cabanaysa. Waxa ay ka murugaysan tahay in indhala'aantu ku timi intii gobannimada la helay. Waxa ku xiga indheergaratadii qoyska ugu maqnayd waxbarashada dibadda oo soo degeysa, iyaga oo la yimid naanayso kala duwan sida: Doktor, Dottore, Dituur, Ditoore; Brofasar iwm. Kala duwanaanshuhu ma aha naanaysaha oo kaliya e qaarkood waxa ay u fekerayaan shuuciyad, qaarna hantigoosi, qaarna musuqmaasuq, qaar kalena doonid xuquuq bini-aadannimo oo aan kuba oollin shuruucda waddanka. Fikradaha qaarkood way iska hor imanayaan ba, qaarna dhibku waa isfahan la'aanta, afka iyo dabeecadaha. Waxa ay riwaayaddu si qurux badan innoo hor keeneysaa is afgaranshawaaga ka dhex dhacay indheergaratadaas, sida ay waxtar u doonayaan ee misna ay u afgaran la'yihiin ummaddii ay wax u tari lahaayeen; sida isafagaranwaagaasi uu u sababay in Dahsoon indhaha loo jeexi kari waayo, oo ay dhakhtar fahma oo afgartaba dhibaatadeeda ay wayday. Isafgaranwaagaasi waxa uu

@SOMALIBOOKS

horseedayaa in Dahsoon silicdo, iyada oo indha la' ay dayacnaani u raacdo, in la furto oo la qaawiyo ilaa ay maroora dillaacdo oo daaqad dheer iska shalwiso.

@SOMALIBOOKS

3. UBUCDA RIWAAYADDA

Aqoon iyo Afgarad waxay si quruxsan innoo hor keeneysaa is afgaranshawaaga ka dhex dhacay indheergaratadaas, iyo dhibaatada uu gobannimada ku keeni karo. Dhinaca kale waxa ay inna tusaysaa in gobannimadu aanay rajo dhigin oo ay la taagantahay guubaabin in dadku isbeddelaan, shaqaystaan, oo la dagaallamaan xumaanta dhexdooda iyo xaqiraadda ay qaybi qaybaha kale ku hayso. Si kastaba ha ahaatee, qofka daawada Aqoon iyo Afgarad, toos ugama dhadhansanayo isku xidhnaansheheeda, farriinta siyaasadeed ee ka aloosantay ka dib markii la dhigay, iyo sida turjumaadda heeseheeda loogu turjumay farriin siyaasadeed oo dahsoon, taas oo sababtey in ay ibafur u noqoto silsiladdii Siinleydii. Arrinkan dib ayaynu ugu soo noqon doonnaa (eeg cutubka 5aad).

Bilowgaba Dahsoon oo gobannimada ah waa la sugayay, markii la helayna waxa lagu soo dhaweeyey ereyadan, iyada oo gumaysiga aad loo ceebaynayo:

Awowgay kuwii siray,

Kuwii sulubka nagu riday,

Soofkiina naga dhacay,

Nimankii sokeeyaha,

Ka dhex riday saraayaha,

Sixirkiyo dhurwaayada,

Nimankii ku sara kacay,

Seeftii gargaartaay!

Sagal iyo hillaaceey!

Seermawaydo hoortaay!

Sida aad ogsoon tahay,

Dadku waa ku sugayeen,

Mudday kuu sabraayeen,

Way ku saadinaayeen,

Haddii saaka aad timid,

@SOMALIBOOKS

Saxarlaay mindhaa nabad.

Haseyeeshee in aan xaalku saalloonayn, markiiba waxa aad dareemaysaa sida ay u dardaarwarisey gobannimadu oo ugu sheegtay dadkii in ay shaqaystaan, oo fadhiga ka kacaan, xaalkuna aanu u ekayn mid lagu farxo.

Marna doox sunsumaaya,

Samayn maayo anuu ye,

Nin seexdaa ma hodmaayo!

Inuu saami ritaana,

Samaday u jirtaa.

Waxa ay judhaba intaa u raacinaysaa dhiillo soo socota, iyo soofdaran habow ay ciddii dalka lagu aaminay ku riddey shacabkii:

Anna waan sasayaa

Sawir baan arkayaayoo

Ninkaad saaka dirteen baa

Intaa ii sanqanaaya.

Sakataan ku jiraaye

Saanaddiinna afaysta

Durraan baan sugayaaye

Intaa ii sabir yeesha.

Dahsoon waxa ay markiiba abbaaraysaa difaaca xuquuqda hablaha, waxay ceebaynaysaa bulshada wali ku dhaqmaysa in hablaha odayaal ka waawayn, oo aanay ka raalli ahayn lagu qasbo oo lagu daro, inta xoolo laga qaato; haddana marka la soo furo ee ay isafgaran waayaan lagu caayo. Waxa ay ku doodaysaa sida dumarku u yihiin lafdhabarta dhaqaalaha guriga iyo kan bulshada, waxana ay ku soo afjaraysaa dooddeeda, iyada oo ragga hoos u gujinaysa:

Hadduu hawlkar yahay ruux,

Waa loo hibeeyaa,

@SOMALIBOOKS

Dalka horumarkiisiyo,

Hìrarkaa la sahansaday,

Waa u heegan dumarkuye,

Maxaa uga horjoogtaan?

Dahsoon waxa ay isu dhagaysanaysaa muuqaallada hore dood kulul oo Raage iyo inantiisa Dulmar ka dhex socota, ka dib markii la soo furey, oo ay ku eedaynayso sababta uu iskuulka ugu diidey markay yarayd ee uu odeyga ugu daray, waxana ay leedahay haddaan waxbaran lahaa maanta waan anfici lahaa naftaada iyo taydaba. Raage se waxa uu ku jawaabayaa in uu danta reerka waday markuu ninka ku qasbaayay. Dahsoon dooddaas iyo murugada guud ee taagan waxa ay ka qaadaysaa indhabeel.

Sida aynu hoos ku arki doonno, riwaayaddu waxa ay daaha ka rogaysaa arrimo muhim ah oo ay ka mid yihiin baahida loo qabo in la garowsado heerka ay dumarku kaga jiraan nolosha iyo in xaqooda bini'aadannimo la qiro; dhiirrigelinta waxbarashada hablaha; dagaalka ka dhexeeya qolada Af Carabiga rabta in lagu dhaqo oo diin ka carar ku eedaynaysa qolada kale ee Laatiinka u ololaynaysa; in laga digtoonaado ku shaqaystayaasha diinta ee ka faa'iidaysanaya aqoon yaraanta dadku diinta u leeyihiin (khuraafaadka). Sheekh Bullaale marka uu soo xero gelinayo Saaqa iyo Dahsoon, si uu u yidhaahdo anaa dawadiina haya, waxa uu leeyahay:

Waxaan ahay sirri daari,

Sheekha seedaha weynee,

Saancaddaalaha meera,

U sarreeya dhammaan baan,

Furihiisa sitaa.

Xalay baa saq badhkii,

lnaad soo socotaan,

Lay sii siiyey warkiinna,

Sidii waa u iftiimay,

Intaa waydin sugaayaye,

Beledan ku salaantay,

@SOMALIBOOKS

Cirirkaydin salaamay,

Hadda aan ka salgaadhnee,

Magacaaga i sii.

Ha la isla silco e, riwaayaddu waxa ay ku dhammaanaysaa wanaag, waxana Dahsoon u gurmanaya, oo dawaynaya ilaa indhuhu u baxaan, bulshada inteeda kale oo iska dhicinaysa indheergaradka la yimi afkaarta kala duwan, kuna qasbaysa inay degaameeyaan aqoontooda oo ku saleeyaan xaaladda iyo hab-nololeedka ummadda. Haddii aad heesaha oo kaliya u fiirsato, oo aad ka dhex saarto arrinka isafgaranwaaga riwaayadda ee guud, waxa kale oo ay riwaayaddu iftiiminaysaa in farriinta abwaannadu ay sidaa ka durugsan tahay, oo xaalku dhaafsiisan yahay is afgaranwaaga afarta aqoonyahan ee afafka kala kaanka ku hadlaya.

@SOMALIBOOKS

4. XAALADDA MAANTA IYO ISAFGARANWAAGA

Garashooyinka debedda inooga yimi, ee mid maaddi ah iyo mid diini ah ba leh, maanta Somaliland waxa ka dhex aloosan isafgaranwaa la mid ah kii lagu qeexay *Aqoon iyo Afgarad*. Waxa lala kala yimi magacyo dhowr ah, iyo kala duwanaansho macnawi ah oo badan. Dhinaca waxbarashada haddii la eego, waxa aad la kulmaysaa dugsiyo aasaasi ah, oo iyaga oo qiraya in ay waafaqsan yihiin manhajka waxbarasho ee qaranka, haddana ku kala xidhan oo ka soo kala jeeda dalal kala duwan. Dalalkaasi waliba fikir ahaan iyo ficil ahaanba qaar ayaa aad isaga soo horjeeda laftoodu. Taasi waxa ay muujinaysaa in aanay suurogal ahayn in ay manhaj qaran wada waafaqsanaadaan manhajyadaasi, haddiiba ay ka soo kala jeedaan dalal fikirkoodu sidaa u kala fogyahay.

Dhinaca afafka haddii aad u fiirsato, gaar ahaan xagaaga, waxa aad dariiqyada kula kulmaysaa dhallinyaro ku hadlaysa Ingiriisi, Carabi, Dhaj, Iswiidhish, Dheenish, Xabashi, Turki iyo Talyaani oo laga yaabo in aan midkoodba kan kale fahmin, kulana hadli karin Af Soomaali. Dhallinyaradaasi oo ku dhalatay debedda, oo xilliga xagaaga fasax ku yimaadda dalka, amaba se reerohoodu ku soo celiyeen waddanka si ay dhaqanka u bartaan, kala duwanaanshohoodu kuma eka oo kaliya luuqadda. Waa nafo ummado kale oo iyaba sii kala duwan ka kala yimi, kuwaas oo la soo huwiyey direys isku mid ah, oo midabka Somaliland leh, loona wada ekeysiiyey Soomaali. Sidee ayay isu afgartaan markaa illay midab kaliya bini'aadamka laguma soo soocee? Sidee ayay wax ugu kordhiyaan ama wax uga korodhsadaan haddii ay isu kooxaystaan kuwo ay meel ka wada yimaaddeen, oo garan waayaan in ay dhex muquurtaan dhaqanka ay hadda uun martida u noqdeen?

Saluuggu haddaba isafagaranwaa luuqadda lagu hadlayo wuu ka wayn yahay.

Dhibaatada runta ahi waxa ay ahayd markaa, imminkana ay tahay Somaliland, waxa ay dadku ka filanayaan aqoonyahan wax soo bartay iyo waxqabadkiisa oo aad u kala fog. Inta badan waxtaryaridu ma aha aqooonyahanka iyo afka uu wax ku soo bartay ee waa musuqa, qabyaalladda iyo qaraabokiilkeeda aan qofna dhigaynin meeshii uu ku habboonaa, loona hawlgelinaynin sidii uu faa'iido ku keeni lahaa. Arrinkaasi markaa wuu taagnaa, imminkana wuu ka taagan yahay waddanka, hase yeeshee riwaayaddu dhinacaas kama ay eegin. Dareenka muuqda ee luuqadaha kala kaanka ah uun bay ka tibaaxcelisay.

Ugu danbayn kala duwanaanshaha aydhiyoolajiyadaha loolanka ahaa markaa e adduunka ka taagnayd (hantiwadaag iyo hantigoosi), waxa imminka halkeedii inoogu jira loolanka fahanka iyo adeegsiga diinta oo kooxo kala kaan ahi ay fikrado kala kaan ah, siyo kala kaan ah dabada uga riixayaan. Dhibaatooyinkii kale ee ay carrabowday riwaayaddu, ee ay ka mid ahaayeen baahiyooyinka waxbarashada ee hablaha, daryeelka bulshada inteeda jilicsan, degaamaynta waxbarashada iyo horumarka, intuba maanta way taagan yihiin.

@SOMALIBOOKS

5. FARRIINTA KALE EE KA SOO BAXDAY AQOON IYO AFGARAD

Heesaha riwaayadda ku jira ee la codeeyey waa siddeed iyo heesta furitaanka, siddeeda hore toddoba ka mid ahi tisqaadeen oo riwaayadda mar la dhasheen, midda siddeedaadna aanay bilowgii ku jirin ee markii ay soo socdeen Gaalkacyo lagu daray[xxi]. Dhammaan toddobada heesood ee la socday jilidda kowaad waxa allifey Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi"[xxii]. Heesta siddeedaad waxa tiriyey Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye". Toddobada hore, ee marka hore jilid ahaan ugu jirey riwaayadda, waxa ay kala yihiin heesta furitaanka *Macallimiin hannuunsan* oo kooxdu wadar ahaan u qaadaysay; S*axarla'* (codka Maxamed Mooge Liibaan; dananka Cabdikariin Faarax Qaarey "Cabdikariin Jiir"), G*udcur aan caddaba jirin* (codka Shankaroon Axmed Yuusuf "Sagal"; dananka Cabdikariin Faarax Qaarey "Cabdikariin Jiir"), Maxay *dhaqasho ii tahay?* (codka Canab Diiriye Cabdi-Gahayr; dananka Cabdikariin Faarax Qaarey "Cabdikariin Jiir"), *Geyaankayga waan heli* (Codka Shankaroon Axmed Yuusuf "Sagal"; dananka Cabdikariin Faarax Qaarey "Cabdikariin Jiir"), *Walaac anigoo ku seexday* (codka Maxamed Mooge Liibaan; dananka Cabdikariin Faarax Qaarey "Cabdikariin Jiir"), *Allahayow nin daacad ah* (codka Maxamed Mooge Liibaan iyo Shankaroon Axmed Yuusuf "Sagal"; dananka Cabdikariin Faarax Qaarey "Cabdikariin Jiir") iyo *Mudantii haweenkaay* (codka darandoorri Xasan Cusmaan "Xasan Feyr" iyo Canab Diiriye Cabdi-Gahayr; dananka Cabdikariin Faarax Qaarey "Cabdikariin Jiir"). Heesta kale ee uu sameeyey Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye" waxa lagu daray kolkii ay riwaayaddu soo gaadhay magaalada Gaalkacyo, heestaas oo aan tisqaadin, waxa qaadday Maryan Cumar[xxiii], danankana waxa saaray Xasan Sabriye "Xasan Great".

Sida Siciid Saalax Axmed ba uu qirayo[xxiv], waxa jirtey in heesaha qaar ay ka horreeyeen riwaayadda. Waxa aan u fasirayaa markaa waxoogaa marin habaabin ah oo loo badheedhay in ay jirtey, oo tusaale ahaan in jiiftada *"Saxarlaay ha fududaan"* way ka horreysay riwaayadda, balse waa la qabadsiiyey, si heesta iyo farriinta ay siddaa ay u baxaan. Ugu yaraan waxa aynu odhan karnaa laba farriimood oo isbarbar socda, oo aan is haysannin, oo midi sheeggan tahay midina sheelan tahay, ayay riwaayaddu inoo wadday:

1. farriinta tooska ah ee riwaayaddu siddey, ee ah is afgarasho la'aanta haysata indheergaradka, amase loollanka dan iyo siyaasadeed ee saamaynta dhaqammada doolka ku ahaa ummadda;
2. farriinta dadban ee tilmaanta waxa ka si ah siyaasadda gudaha oo ay heesaha qaarkood sideen.

Waxa aad arkaysaa, waliba farriintan labaad, in ay riwaayaddu wax ka wayn sheegayso xaalka soo xumaaday ee waddanka, kana digayso aafo qaran oo soo fool lahayd markaa. Nasiib darro aafadaasi way rumoobi doontaa. Tusaale ahaan heesta *"Walaac aniga oo ku seexday"* waxa ay ka dayrinaysaa sida loo majara habaabiyey qarannimadii ee dhagar wayn looga galay, shaqo loo qabtay oo loo dadaalay, haddana cid kale u daba martay, oo kharribtay, dayacday oo waliba lunsatay wixii la wada lahaa. Waxa na ay leedahay:

Walaac anigoo ku seexday,

@SOMALIBOOKS

Maxaan walbahaar la toosay,

Wareer anigoo asqaysan,

Maxaan werwer jiifi waayey;

Maxaan sida weer cadhaysan,

Saqaa dhexe gaaf wareegey;

Intuu waqal ii hillaacay,

Maxaan kula rooray weelka,

U baydhay wadiiqo leexsan,

Wakhtigu i tilmaami waayey;

Jacaylku muxuu i wiiqay,

Muxuu wadnahayga shiilay;

Maxaan shimbiraha waraystay,

U dhiibay waraaq daboolan,

Haaddii wacdigayga qaadday,

Cid weeye tidhaahda weydey;

Waayeel dadow,

Inaan waalanahay,

Duni weer siddoo,

Weligeed dhintoo,

Wacadkiyo xadhkii,

@SOMALIBOOKS

Weydaarataan,

Weetaynayaa.

Wadeeco maxaan ilaashey,

Waraabe ka soo xereeyey,

Sac weyda maxaan u dhaanshey,

Walwaal ugu soo arooray,

Halkiisa ku soo waraabshey;

Maxaan weli soo kaxeeyey,

Wadaaddo maxaan u yeedhay,

U loogay wankayga fiican,

Waxyeello halkay u taallo,

Naftayda maxaan ka waanshey;

Walaalkay nimaan u haystay,

Muxuu waddo ii fadhiistay,

Qof aan wehelkayga mooday,

Ka qayb galay weerarkayga,

Ruuxaan la wadaagey oontu,

Ku wiirsadey dhiilladayda.

Waayeel dadow,

@SOMALIBOOKS

Inaan waalanahay,

Duni weer siddoo,

Weligeed dhintoo,

Wacadkiyo xadhkii,

Weydaarataan,

Weetaynayaa.

Maxaan wacdaraha adduunka,

U soo jiray waayaheeda,

Warkeeda la ii dhammeeyey,

Maxaa waran layla doonay,

Habeennimo layla waayey,

Nasiib kaga waabariistay,

Wadkayga la ii shirqoolay;

Maxaan dacar lay walaaqay,

Waabeeyo ku caafimaaday,

Maxaan webiyaal is-jiidhay,

Dhexdooda ka waab samaystay;

Maxaan wacad layla qaatay,

Rumaystay Wallaahi beena,

Wanaag anigoo sameeyey,

@SOMALIBOOKS

Maxay wadhi ii dambeysey.

Waayeel dadow,

Inaan waalanahay,

Duni weer siddoo,

Weligeed dhintoo,

Wacadkiyo xadhkii,

Weydaarataan,

Weetaynayaa.

@SOMALIBOOKS

Way muuqataa in farriintu ka shisheyso is afgarasho la'aanta aqoonyahannada ku soo bartay Af Carabi, Af Ingiriisi iyo Af Talyaani ee ay jilidda riwaayaddu inoo sheegayso. Halkan abwaanku si toos ah buu u sheegayaa in la is khiyaameeyey, oo la isku wacad furey. Waxa se iyana cad sida aanay heestu ula wada haysan sheekada guud ee riwaayadda: tusaale Durraan oo heesta qaadayaa muuqaalka saddexaad, inta ka horreysa muuqaalkaas meelna kuma cadda waxa uu dadka u qabtey ee uu ku majeeranyo dadka kale inay dayaceen oo lumiyeen[xxv]. Hadraawi waxa uu kaga duwanaa aqoonyan badan oo markaa hagaayay fikirka waddanka in uu saluugsanaa Hantiwadaagga iyo Sinnaanshaha ku salaysan fikirkii Bidixda ee markaa socdey. Waxa taa laga dhadhansan karaa sida uu sinnaanta uga hadlay heestiisa "Saxarlaay ha fududaan"[xxvi]. Sir maaha in saaxiibbadii ku xaman jireen niyad xumida iyo walaacan uu dadka daba wado, heestanina halkaas bay salka ku haysaa. Hadraawi. waagaas ma uu lahayn aydhiyoolajid gaar ah; Bari iyo Galbeed ba waxa ay u ahaayeen duni shisheeye. Hammigiisu waxa uu ahaa Soomaalinnimo iyo shanta Soomaaliyeed oo midooba oo horumara. Waxaa kale oo uu u taagnaa difaaca xorriyadda iyo caddaaladda iyo xuquuqda dadkiisa, aydhiyoolajid gaar ah se u ma lahayn[xxvii]. Waxa kale oo Hadraawi waraysi danbe ku garnaqsanayaa in sababta keentay in ay bilaabantay *Siinley*, oo macneheedu yahay sababta ay u soo baxday *"Saxarlaay ha fududaan"*, ay tahay xaaladda markaa jirtey oo ah in wixii maanso ahaa oo dhan loo adeegsaday kacaanka, oo taliskii markaa jirey uu isagu isku xeerey[xxviii].

Arrinka kale ee xiisaha leh ee muujinaya sida iska-caabbinta dhaqammada kale ee debedda ka yimi aan loo wada maagin waxa weeye, sababta loogu soo dari waayay canaanta dhallintii Ruushka wax ku soo baratay oo markaa aad uu tiro badnayd, waliba ciidammada ugu ba tirada badnayd. Kacaanka oo kaliya ma ah ee, aqoonyahanka markaa fikirka jihaynayay qaarkii waxa ay ahaayeen garabka Bidix, waxana ay u haysteen Soomaaliya in ay Ruushka jaal la tahay ayna tahay in la ilaashado.

Maagista tooska ah ee riwaayaddu ku maagayso maamulka waxa si cad looga dheehan karaa heesta kale ee *"Allahayow nin daacad ah"*, ee ay kusoo afjarmayso. Marka qallooca la sheego, ee ceebaha la taxo, waa ma ay guushii taagantahay oo ay gobannimada indhuhu u furmeen; dadkana la kala bartay oo kii waddaniga ahaa iyo kii daallinka ahaa kala baxeen. Markaas bay heestu u waydiinaysaa Ilaahay xaq soor, oo leedahay Allow daacad iyo Daallin ha simin:

[...]

Afku hadalka daayaa

Dibnihiisa haystaa

Doqon kaa nasiib lihi

Marka ay ku dooxdee

Birta kaala daashee

Kuu celiso daabkee;

Catowgaa hora waxa raacaya iyada oo guushii timi:

Waxay doodi furan tahay

Ruux kuu darraan jirey

Marka aad ku digatee

Xaqu kuu dulleeyee:

Markaas oo la kala bartey dadka kii u daacad ah iyo kii dulmiyaayay, ayaa hadda la Alle baryayaa:

Allahayow nin daacada

Allahayow nin daalina

Deeqdaada haw simin.

Dhinaca kale riwaayaddu waxa ay taabanaysaa arrimo bulsho oo markaa taagnaa, maantana taagan, oo ay ka mid yihiin:

@SOMALIBOOKS

5. 1. Ka digista sheekh beenaalayaasha dadka beenta ku daweeya

Riwaayaddu waxay hoga-tusaalaynaysaa in aanay waxba ka jirin sida uu “Sheekh Bullaale” u yidhaahdo waan amranahay oo dawo ayaan idiin hayaa, lacagtana islaamaha kaga furto. Sheekh Bullaale waxa uu ku harawsanayaa islaanta Saaqa magaceeda oo uu ku leeyahay:

Magacaaga suluugay

Sumaddiisu ma fiicna

Suuradaa kutubteenna

Saaxi loogama baadhin

Soddonkii jis ka waayey

Yaa, Saaqa, "saa", Saaqa, "saa"

Saymo "qa" qandho

Saaqa, "saa" saar

Ma saymay la qandhootay?

"Qaa" qadiim

Saar qadiimiya weeye

Marka aad subaxdii

Sara joogso tidhaahdid

Sidii uu jin ku riixay

Ma kuftaa saddex jeer?

Markaasay Saaqi dabinka ugu dhacaysaa oo ku jawaabi “Sarajoog iska daayoo, siqidii hollin waayay”. Maanta waxa ka taagan waddanka marka aad hoos u eegto waxa aad arkaysaa in dad badan oo caafimaad ka doonayo meel aan ku habboonayn oo khuraafaad iyo beenaale sheeganaya wadaad uu ugu warramo wax aayo lahayn, islamarkaana kaga dhaco xoolo badan. Waa arrin kale oo riwaayaddu maalintaa ka digaysay, maantana ay tahay in la isu sheego.

@SOMALIBOOKS

5.2. Ku tagrifalka xoolaha dadwayne

Inta indhaha Dahsoon daawo loo doondoonayo ee kolba dhakhtar af kale ku hadlaya lala beegsanayo, waxa Dahsoon ka warwarinaya sida ay cidlada u fadhido oo waxa ay u cabanaysaa Caalin (macallinka dugsiyada oo astaan wanaagsan sita) leedahay halkeen u kacaa? Waxase ay farriinteeda hoose ku tilmaamaysaa sida dalkii uu gacanta ugu galay qawlaysato ummaddii qaawisay oo hugii xitaa ka furatay (xatooyo xoolo dadwayne); kuwaas oo aan u diirnaxayn dadka intiisa kale oo iyana sii cayilaya maalin kasta oo ummadduna sii curyaanto. Waxay leedahay:

Yaa carruurtii halleeyey?

Caanihii dhashu aaway?

Hashii yaa candho gooyey?

Cindiid yaa na wadaajay?

Isna sii cayilaaya!

Camalkiinnu xumaa!

Bal ayaan u cawdaa?

Yaa codkayga kasaaya?

Dhaayahaygan caweermay,

Yaa curuuqda dhayaaya?

Jijimii cududdaydiyo,

Canbarkii surku' aaway?

Mee hugaygi cusbaa?

Alla yaan cuskadaa?

Ciirsi yaan ka filaa?

Intaan ciidan helaayo,

Ama ciil ka koraayo,

@SOMALIBOOKS

Caalin! Yaan ku hirtaa?

Haddaba sheekada shishaysa ee ay riwaayadda *Aqoon iyo Afgarad* waddo waxa ka mid ah sheegista musuqmaasuqa iyo ka digista cawaaqibxumada uu leeyahay. Waxa ay Dahsoon oo afkii gobannimada ahi sheegaysaa in haddii la horreysiiyey dantii shaqsiga, tii ummadda na la dayacay, in ay iyadu markaa cidla ciirsila taagantahay. Waa arrinkale oo maanta taagan oo ah in la isu sheego.

5.3. Muhiimmadda waxbarashada hablaha iyo guud ahaan xaqa haweenka

Sida aynu hore u soo aragnay gobannimada oo codka Dahsoon ku hadlaysaa waxa ay isu dhagaysanaysaa Raage iyo reerkiisa, kuna canaanaysaa sida ay u dayaceen waxbarashada hablaha. Waxay ka digaysaa in aan la diyicin dumarka, xaqood koritaan ee maskaxdana la dhowro. Nuxurku waxa weeye haddii bulsho kala badhkeed la dayaco aqoontooda, kartidooda iyo wax soosaarkooda, bulshadaasi ugu yaraan waxa ka maqan kalabadh wixii ay soo saari lahaayeen. Haddii waliba gef loo geysto kalabadhakaa, oo la dago xaqooda, oo la dulmiyo xuquuqohooda, markaa in dumitaan iyo halaag ay ummaddu ku danbaynayso waa in la isaga digaa. Xaaladdaas mid la mid ah maanta waxa ay ka taagantahay meelo badan oo adduunka ka mid ah. In farriitan mar labaad iyo mar saddexaadba la isu sheego waa mid aan laga maarmayn.

@SOMALIBOOKS

5.4. In haddii la dayaco garsoorka, xaqsoorku dhimanayo

Dood dhexmaraysa dhallinyarada aqoonyahanka ah waxa ay tilmaamaysaa in maxkamadihii la dayacay, laga gooyay dhaqaalihii ay ku shaqayn lahaayeen, oo siyaasiyiintu tartan iyo doorasho ku galeen xoolihii ummadda. Silica maxkamadaha bilaa baansiinka ahina keenayo in maxkamadihii xaqa sidii uu ahaa u soori waayaan. Dalmar waxa uu leeyahay mar:

Aadan Xaaji Abraarkii,

Maxkamadaha u sarreeyey,

In yar baan isla taagay,

Waa isaga oon gaadhi lahayn,

Maxkamaddii ay ku yaraatay,

Bansiinkii ay in jareenoo,

Doorasho ay ku galeen,

Markaas buu ka dardaar warinayaa xaalka oo leeyahay waxaan ka baqayaa in aan ka tahriibo.

Ma arligeenna sidaasaa,

Adduunkaa wax la qaybsan,

Mar mar baan is idhaa,

Aroortiiba ka dhoof,

Arli weeye la aasay,

Abdo loo heli maayo,

Sida aynu ka yeello,

Maa inoo talisaan.

@SOMALIBOOKS

Haddii heesaha qaar ay abbaarayaan farriinta riwaayadda, sida “Maxay dhaqasho ii tahay?” oo dhextaalkeedu yahay:

Haddii aanu dheehiyo

Rajo dhawrta lagu sabo

Kala nahay dhashaydii

Maxay dhaqasho ii tahay?

Dhereg maxaan ku falayaa?

Dharku muxuu i tarayaa?

Dhaldhalalka beentii

Muxuu iiga dhiganyahay?

Heesaha kale qaarkood waxay sheegayaan in loo baahan yahay in qaranka buka in degdeg loo daweeyo oo laga daayo sasabada.

Ruuxii curyaan ihi

Carrabkiyo ishaarada

Kuma caafimaadee

Haddaan ceebta igu taal

Ama cudurka aan qabo

Curuuqda iyo dhaayaha

Cilmi lagu dawaynayn

Cadka layga jeebayn

Cartir layga marinayn

Badhi lay cabsiiyiyo

Cashar muxuu i tarayaa?

@SOMALIBOOKS

Waxana ay sheegaysaa heestu in haddiiba uu wax san qarankan uu u soo kordhey, in wixii samaa meel ba'an la mariyey oo aanay ummaddii ay ka dhaxaysay wada lahayn:

Cirkan hoorrimaad iyo

Curashada daruuraha

Calcalyada xareeddee

Isa soo cidhiidhiday

Dhulkan wada cagaarka ah

Cosobkaa isgaadhiyo

Caleentiyo barwaaqada

Dhallin lala caweeyiyo

Heestiyo ciyaaraha

Haddaan calafba ii gelin

Miyay ii cuntamayaan?

Markaas buu abwaanku ku bilaabayaa heestan in haddii aanay aqooni jirin oo indhuhu aanau ummadda u furnayn, oo aanay wax arkaynin, in aan markaa laxaadka kale, sida kuwa cararka iyo iska dhicinta cadawguba aanay aayo lahayn:

Gudcur aan caddaba jirin

Indhahaa cadceedoo

Cidla kaaga weheloo

Cabsi kaa kaxeeyoo

Bahal kaala cararee

Labadeenna caynaan

Haddii caad ku xidhan yahay

Cudud iyo lixaad kale

Illayn laguma ciil baxo

Addimadu ma ciidmaan

Culays kaama qaadaan.

@SOMALIBOOKS

Maansoyahanku se rajada ma wada dhigayo oo waxa uu mar dhexe leeyahay, ummaddan cid baa u kacaysa oo ka dhicinaysa hororka qabsaday ee meesha daran wax mariyey, waxana uu dhextaal uga dhigayaa heesta "Axmed Gurey ma uu dhiman":

Waxaan uga gol leeyahay,

Haddii geesi ii kaco,

Geyaankayga waan heli.

Heestan oo farriin cad u direysa inta dalka rajada ka leh, soona qaddimaysa in xaqdarradu guuldarraysan doonto, waxa tuduc ka mid ah uu maansoyahanku inna leeyahay:

Garta eexo loo naqo,

Waa lagu gubtaayoo,

Way soo guclaysaa,

Soo maalin gaashaa,

Soo guura raacdaa,

Kolla gaabin maysee,

Golihii timaaddaa,

Geedkii istaagtaa,

Aarkeeda gudataa,

Gashi nimay ku leedahay,

Guulaysan maayee,

Waxay qalabsadeen bay,

Gaaxdeeda leeyiin;

@SOMALIBOOKS

Haddii heesta "*Mudantii haweenka*" uu jacayl aad u qotodheer ku sheeganayo arbuhu, isaga oo leh

Mudantii haweenkaay

Marwadii la sheegee

Dadku wada majeertaay

Dumar lama maseeyee

Muxubbada kalgacalkaay;

Laanyahay magooshee,

Midhihiyo caleentiyo,

Manka lagu tallaalee,

Ubax lagu marriimee,

Qurux lagu mannaystaay;

Muddo aan yarayn baan,

Kugu soo maqnaayoo,

Ma ogtahay habeennadan,

Sida mayayga roob oo,

Kolba maayad keenaad,

Ii muuqataayoo,

Muhashada jacaylkaan,

Hadba soo mirkacayaa.

@SOMALIBOOKS

Dhinaca kale maansoyahanku farriin buu u dirayaa inta uu ku tuhmayo talo iyo aqoon wadaag marka uu ku daray jawaabta “Saxarlaay ha fududaan” oo dhextaalkeedu yahay.

Waan soo socdaa kow dheh,

Waxna waan sidaa laba dheh,

Samir yeelo weligaa,

Saxaylaay ha fududaan.

Heestan “Saxarlaay ha fududaan” way ka qoto dheertahay inta laga yaqaanno. Marka hore si toos ah ayay ula socotaa farriinta riwaayadda, oo cabashada gobannimada ayay kaga jawaabaysaa in wax wanaagsani u soo socdaan, loona maqanyahay e ay sugto. Haddana sida aynu hore usoo sheegnay heestu wayba ka horreysay riwaayadda. Waxa ay dhinac ka dardaarwarinaysaa degdegga.

Salfudaydku Xaawuu,

Jannadii ka saaree,

Ruuxaad sugaysoo,

Maqan waa la saadshaa,

Sahan waa la dhowraa,

Ha sahwiyin ha selelin,

Sarka dhaban ha noqonnin.

Waxa ay leedahay ka feejignow hadalka iyo dacaayadaha la faafinayo ee lagu maaweelinayo bulshadana la gu marin habaabiyey.

Kala saar run iyo been,

Kala garo sir iyo caad,

In salaaddu weligeed,

Kala tahay sunniyo farar,

U ogow sax iyo maan.

@SOMALIBOOKS

Bayd ka mid ah kuwa ugu culayska badan ee Saxarla waa "Inaad saamo jiiddiyo; Sanqadh tirasho kala daa" oo loo turjumi karo ha qaylinnin oo haddana ha doonin in lagu maqli waayo, samuhuna wuu iman doonnaaye halloo shaqeeyo, si aanu u dhicisoobinna, aynu shimbira waaqlaynta joojinno.

Sidii la filaayay heesta "Saxarlaay ha fududaan" ma ay noqon mid aan la dhaadin, waana heestii jawaabteedu bilowday silsiladdii caanka noqotey ee "Siinleyda".

6. GEBAGABO

Riwaayadda “Aqoon iyo afgarad” waxa ay jeexday waddo cusub oo suugaanta curinteeda farsamo ahaan, iyo adeegsiga suugaanta garaad korina ahaanba, ilaa maanta ay saamaynteedii muuqato. Waxa kale oo ay muujisey nugaylka Soomaalida oo aqoonyahankeedii ku kala jabay fikir ay markaa u wada arki karayeen in bulshada lagu dhisi karayay. Kala jajabka aqoonyahanka ee qaarkood indha-la'aan ku taageereen maamulkii markaa jirey, kuna colaadiyeen aqoonyahannadii waday xaddaaradda xumaan diidka ah, waxa ay qaawisey in aqoontii laga dhawrayay jiilka cusub ee indheergaradka lagu hungoobay. Maamulkii kacaanku wuxuu ku guulaystay waagaas ba in warbaahinta iyo ilaha wacyigalinta ee ummaddu ka kori lahayd lagu koobo ammaanta kacaanka, iyo ka been abuurka fikir kasta oo kale oo la doodi karayay.

Haddaba, indheergaradka maanta ee bulshada hagaya waxa looga baahan yahay in casharkaas hore la dhugto, oo laga barto wixii qaldamay.

Tusaale ahaan:

- in la ogaado in warfaafinta, wacyigalinta iyo waxbarashadu yihiin saddex hay'adood oo isku sidkan, lagu na adkaysto in muqararka dugsiyada dalka la mideeyo, lagu dhiso waddaniyad la degaameeyey, islamarkaana loo adeegsado suugaanta sidii ay qayb laxaad leh uga noqon lahayd hirgelinta wacyigalintaas.
- in aanu aqoonyahanku faraha dib uga laaban kaalinta doodaha iyo wacyigalinta bulshada oo, tusaale ahaan wargeysayada iyo ilaha kale ee warfaafineed, aan loo faraha looga qaadin dacaayadaha dawladda ama kuwa kasoo horjeeda. Guul laguma gaadhi karayo in debedda la istaago oo canaan uun la wado, waase in aqoonyahanku qayb ka ahaado abuuridda xaddaarad sii marta wacyigalin bulsho oo loo maro dhammaan hay'adaha warbaahineed.
- in aanu aqoonyahanku ku milmin dhibaatada bulshada oo aanu qayb ka noqon. Tusaale: shalay waxa dhacday inay dooddii korin lahayd garaadka bulshada ee indheergaradku ku soo ururtey taageeridda dawaladdii Kacaanka ee markaa jirtey iyo colaadinta ciddii wax ka sheegta ba; taasi oo lumisey hadafkii ay yeelan lahaayeen dooduhu, islamarkaana bulshada garaadkeeda korin lahayd. Maanta mid la mid ah ayaa taagan oo aqoonyahanku wuxuu dib ugu noqdey taageeridda qabyaaladda iyo qayb ka ahaanshaha dhibaatadii uu xallili lahaa.

@SOMALIBOOKS

Dabadhah

Heesaha ku jira Aqoon iyo Afgarad oo tifatiran

Waxa heesaha faalleeyey Rashiid Sheekh Cabdillaahi Axmed "Gadhwayne"

@SOMALIBOOKS

"Saxarla'", Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi"

Tixadani waa tu aad u cufan oo wax badan, hal mar ka wada hadlaysa. Tuduca u horreeya oo ah kow iyo labaatan meeris waa weedh mid ah oo ku ursursan ujeeddo mid ah; taas oo odhanaysa kala-sarraynta iyo kala-sedroonidu waa qadder Alle oo saluug ma laha. Halkan samirka kiisa quusta ah baad mooddaa in tixdu boorrinayso, misna waxa uu Hadraawi ka daba keenayaa tu yididdiilo leh. Waxa uu ka digayaa salfudayd iyo deg-deg iyo quusasho. Waxa uu dhiirrinayaa sabirka kiisa ah miyirka ee dhabar-adayga leh. Waxaa ku jira oo caqiibo leh baaqa qunyar socodka ee in wax walba waxa uu yahay loo garto. Labada sabir ee kala ah quusta iyo deg-degga oo la iska ilaaliyo sidee isu waafajinaa?

Meersyada jacayka gabdheed u muuqda ee ay tixdu ku dhammaanaysaa, malaha jawaab bay sarbeebayaan. Kollay ba waa run oo waxa loogu dheggan yahay xorriyaddu, waa jacayl dhalan ah oo loo qabo.

@SOMALIBOOKS

Ku sinnaan dharaartii,

La sargooyey dunidee,

Rabbigeen sameeyee,

Cirka sare u taagee,

Xiddigaha siraatiyo,

Dayax suudi meeriyo,

Lagu sugay cadceeddee,

Sagalkiyo daruurtiyo,

Lagu xidhay sitaacee,

Dhulka gogol la seexdiyo,

Sabo lagu negaadiyo,

Laga dhigay sindadabkee,

Buuraha la saaree,

Dhirta samayda ciiddiyo,

Salka loogu joojee,

Saddex laab bad iyo webi,

Lagu yidhi sabbeeyee;

Dabadeed la saanyee,

Qofba meel la siiyee,

Saldhigeedu qaydnaa;

Cidi uma sinnaynoo,

Dadku ruux sabooloo,

Saranseer ku raagiyo,

Guryo samo nin yaalloo,

Sidka dhalay ku haystoo,

Hela seermaweydiyo,

Laba kala sed roonbaa,

Subax noolba joogee.

Waan soo socdaa kow dheh.

Waxna waan sidaa laba dheh.

Samir yeelo weligaa.

Saxarlaay ha fududaan.

Salfudaydku Xaawuu,

Jannadii ka saaree,

Ruuxaad sugaysoo,

Maqan waa la saadshaa,

Sahan waa la dhowraa,

@SOMALIBOOKS

Ha sahwiyin ha selelin,

Sarka dhaban ha noqonin,

Ha saluugin qaybaha,

Qalin baa saxeexee;

Waxaan saatir kuu qorin,

Ha u suul dhabaalayn,

Kala saar run iyo been,

Kala garo sir iyo caad,

In salaaddu weligeed,

Kala tahay sunniyo faral,

U ogow sax iyo maan;

Inaad saamo jiiddiyo,

Sanqadh tirasho kala daa,

Naf jacayl sawaaboo,

Sanka kuu dalooshoo,

Kuu sudhay hoggaanbaad,

U siddaa maqaarkee,

Ha ku daba saqlaysee,

Ha u gaabin seetada,

Sogsogtiyo cadaaddiyo,

Ha ku saydhin laamaha.

Waan soo socdaa kow dheh,

Waxna waan sidaa laba dheh,

@SOMALIBOOKS

Samir yeelo weligaa,

Saxarlaay ha fududaan.

@SOMALIBOOKS

"Gudcur aan caddaba jirin", Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi"

Waxa ay tixdani leedahay: Haddii laxaadka wax araggu qaayo leeyahay, laxaadka cilmiga ayaa ka sii qaayo weyn. Indho la'aantu halkan, waxa aad mooddaa in ay sarbeebayso cilmi la'aan. Waa haddii aynu gabadha indhaha la' ka dhiganno gobannimadii oo aan cilmi lagu daryeelo loo lahayn. Waxa macnahan innoo sii bidhaaminaya sadarrada ku jira tuduca labaad ee isbarbar-dhigaya daawaynta cilmiga iyo badhi la is cabsiiyo ama cashar la isu dhigo. Si kale na tixdu waxa ay leedahay cilmi la'aanta ay indho la'aanta ku sarbeebaysaa, waa calaf la'aan. Waayo khayraadka Alle adduunka ka dhigay, qof ka jaahil ahi si buuxda uma calfan karo, illeen la ma soo bixi karee. Xataa qurxda iyo sureerka abuurta si buuxda u ma dhadhamin karo ma na quudan karo.

Gudcur aan caddaba jirin,

Indhahaa cadceedoo,

Cidla kaaga weheloo,

Cabsi kaa kaxeeyoo,

Bahal kaala cararee;

Labadeenna caynaan,

Haddii caad ku xidhan yahay,

Cudud iyo lixaad kale,

Illayn laguma ciil baxo,

Addimmadu ma ciidmaan,

Culays kaama qaadaan.

Ruuxii curyaan ihi,

Carrabkiyo ishaarada,

Kuma caafimaadee,

Haddaan ceebta igu taal,

@SOMALIBOOKS

Ama cudurka aan qabo,

Curuuqda iyo dhaayaha,

Cilmi lagu dawaynayn,

Cadka layga jeebayn,

Cartir layga marinayn,

Badhi lay cabsiiyiyo,

Cashar muxuu i tarayaa?

Cirkan hoorrimaad iyo,

Curashada daruuraha,

Calcalyada xareeddee,

Isa soo cidhiidhiday,

Dhulkan wada cagaarka ah,

Cosobkaa isgaadhiyo,

Caleentiyo barwaaqada,

Dhallin lala caweeyiyo,

Heestiyo ciyaaraha,

Haddaan calafba ii gelin,

Miyay ii cuntamayaan?

@SOMALIBOOKS

"Maxay dhaqasho ii tahay", Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi"

Tixdani waxa ay u muuqataa dalkii iyo xorriyaddii (nuxurka maldaha suugaaneeed waa isku mid e) oo hadlaya. Waxa ay siddaa duluc akhlaaqeed oo qoto dheer. Maahmaahdeedu waa qofba waxa uu dhitaysto ayaa u yaal oo uu dhaqayodeeda maalaa. Dalkii baa hadlaya oo ka cabanaya anshax darro dadkiisu kula dhaqamayaan. Waxay sugaysaa tixdu in dhimashadu ka doorran tahay dhegxumada oo la qaayibo. Waxay si la yaab leh u sawiraysaa xaaladda lagu dambaynayo, marka ay dadka danqashadu ka guurto ee xumaha laga siqsiqi waayo. Waxaa tixdan yar ku jiro murti culus oo maguuraan ah.

Qofba wuxuu dhitaystaa,

Dhaxalkiis ahaadoo,

Dhibi kama maqnaatee,

Sow dhiig islaameed,

Dhiil hadimo kuma shu'ban,

Haddaan dhuuni raac ahay,

Dheg xumaanta nololeed,

Dhimashada xalaaleed,

Sow iima dhaanteen?

@SOMALIBOOKS

Haddii aanu dheehiyo,

Rajo dhawrta lagu sabo,

Kala nahay dhashaydii,

Maxay dhaqasho ii tahay?

Dhereg maxaan ku falayaa?

Dharku muxuu i tarayaa?

Dhaldhalaalka beenti'i,

Muxuu iiga dhigan yahay?

Sawnigan dharkayn iyo,

Cunay xabag dhunkaaleed,

Dhererkiyo laxaadkii,

Sawnigan ka dheelliyey,

Sawnigan dhawaaqiyo,

Dhiillada maqlaayee,

Dhaayihii wax araggiyo,

Dhegihii i awdmeen,

Dhulku ila hadlaayee,

Dhirtu igu muddici tahay.

Haddii aanu dheehiyo,

Rajo dhawrta lagu sabo,

Kala nahay dhashaydii,

Maxay dhaqasho ii tahay?

Dhereg maxaan ku falayaa?

Dharku muxuu i tarayaa?

Dhaldhalalka beenti'i,

Muxuu iiga dhigan yahay?

@SOMALIBOOKS

"Axmed Gurey ma uu dhiman", Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi"

Haddii tixda *Saxar la'* yamxeerin meelo laga dhadhaminayo, tixdan *Axmed Guray ma uu dhiman*, filasho sami weyn baa ka muuqata. Waxa ay isdaba dhigaysaa xaaladaha guuldarro aan laga soo waaqsan karin kuwa ay yihiin; giddi ba se way anfiyeysaa. Waxay leedahay dhibaata kastaa ha jirto ee waxaa jirta ayaayo-sami ku xidhan hoggaan wacan. Geesi u kaca ayey sugaysaa. Guul bay ku yididdiilo qabtaa iyo maalinteeda oo ay nin ba wixii uu galabsay siin doonto.

Wuxuu galowgu qayshaa,

Ama fiintu goohdaa,

Cudcur kugu ballaadhaa,

Gabbal kaa madowyahay,

Badi kugu galgalataa,

Kugu gaaf wareegtaa,

Cirku kugu gadoodaa,

Gabadano ku qabataa,

Webi kula gurguurtaa,

Kolba gacan ku qaadaa,

Geriyaad nasiibkaa,

Marka uu ku geeyaad,

Ku gunaanad weydee;

Axmed Gurey ma uu dhiman,

Ma goblamin darwiishkii,

Geenyadu ma daallana,

Ma af beelin gamastii;

Waxaan uga gol leeyahay,

@SOMALIBOOKS

Haddii geesi ii kaco,

Geyaankayga waan heli.

Waxa aad sidii geri,

Ama awr gabraareed,

Keli gooni socotaa,

Gama' layska waayaa,

Gocoshada la ooyaa,

Ilmo gabax tidhaahdaa,

Markaad geeri iyo nolol,

Midna gaadhi weydee,

Gacal iyo sokeeyiyo,

Nimaad garabka saartiyo,

Cid aad garato weydee,

Gebi dhexe istaagtee,

Talo kaa gurracantee;

Axmed Gurey ma uu dhiman,

Ma goblamin Darwiishkii,

Geenyadu ma daallana,

Ma af beelin gamastii;

Waxaan uga gol leeyahay,

Haddii geesi ii kaco,

Geyaankayga waan heli.

@SOMALIBOOKS

Garta eexo loo naqo,

Waa lagu gubtaayoo,

Way soo guclaysaa,

Soo maalin gaashaa,

Soo guura raacdaa,

Kolla gaabin maysee,

Golihii timaaddaa,

Geedkii istaagtaa,

Aarkeeda gudataa,

Gashi nimay ku leedahay,

Guulaysan maayee,

Waxay galabsadeen bay,

Gaaxdeeda leeyiin;

Axmed Gurey ma uu dhiman,

Ma goblamin Darwiishkii,

Geenyadu ma daallana,

Ma af beelin gamastii;

Waxaan uga gol leeyahay,

Haddii geesi ii kaco,

Geyaankayga waan heli.

@SOMALIBOOKS

"Walaac anigoo ku seexday", Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi"

Tixdani gaabani waxa ay ka mid tahay mudanka maansada Hadraawi, waayo laxowga dareenka ay xambaarsan tahay iyo hab dhisaalaha maanseed ee ay warkeeda ku soo tebinayso, ayaa mudnaanta siinaya. Waa hawaale-tebin ay baaniso ku jirto. Jawigeedu, sida uu u dhan yahay, waa hadimooyin iyo haydaaro ba, inta daran ee waayaha nolosha laga kulmo. Maxay tallow Hadraawi ka daarranayd? Marka aynu iska illowno riwaawadda ay ku jirtay, waxa ay tixdu ina dareesiinaysaa been la isu sheegay iyo ballanfur dhacay. Waxaa inoo muuqanaya hankii iyo himiladii laga lahaa madaxbannaadii qarannimo ee lixdannadii qarnigii labaatanaad iyo badhirfurka ka daba yimi. Waxay tixdu si dadban inoo tusaysaa dadweynaha lagu wacad furayey iyo hungadii joogtada noqotay. Wanaagga dadku mar walba falayey iyo sida looga abaal-dhacayey bay si kale inoo tusaysaa.

Dhinac kale na, tixdu waxay ina xusuusinaysaa tajrubaad jacayl aad u xanuun badanaa oo xilligaa Hadraawi soo maray iyo guuldarradii uu ku dambaeeyey. Waxaad mooddaa inay tixdani taas ku la bah tahay tixihii Hadraawi ee tajrubadaas cabbirayey, sida *Arraweelo Dumar* oo kale. Tixdan waxaa ka dhadhamaya xanuun si shakhsi ah ama keli ahaan Hadraawi u hayey. Marar badan ayuu halabuurku -xataa isaga oo aan isogayn-ka tibaax-celiyaa danqashada nabar isaga meel fog kaga yaal.

@SOMALIBOOKS

Walaac anigoo ku seexday,

Maxaan walbahaar la toosay,

Wareer anigoo asqaysan,[*Wareer anigoo la liita*: Halkaraan]

Maxaan werwer jiifiwaayey;

Maxaan sida weer cadhaysan,

Saqaa dhexe gaaf wareegey,

Intuu waqal ii hillaacay,

Maxaan kula rooray weelka,

U baydhay wadiiqo leexsan,

Wakhtigu i tilmaami waayey;

Jacaylku muxuu i wiiqay,

Muxuu wadnahayga shiilay,

Maxaan shimbiraha waraystay,

U dhiibay waraaq daboolan,

Haaddii wacdigayga qaadday,

Cid weeye tidhaahda weydey;

Waayeel dadow,

Inaan waalanahay,

Duni weer siddoo,

Weligeed dhintoo,

Wacadkiyo xadhkii,

Weydaarataan,

Weetaynayaa.

@SOMALIBOOKS

Wadeeco maxaan ilaashey,

Waraabe ka soo xereeyey,

Sac weyda maxaan u dhaanshey,

Walwaal ugu soo arooray,

Halkiisa ku soo waraabshey;

Maxaan weli soo kaxeeyey,

Wadaaddo maxaan u yeedhay,

U loogay wankayga fiican,

Waxyeello halkay u taallo,

Naftayda maxaan ka waanshey;

Walaalkay nimaan u haystay,

Muxuu waddo ii fadhiistay,

Qof aan wehelkayga mooday,

Ka qayb galay weerarkayga,

Ruuxaan la wadaagey oontu,

Ku wiirsadey dhiilladayda;

Waayeel dadow,

Inaan waalanahay,

Duni weer siddoo,

Weligeed dhintoo,

Wacadkiyo xadhkii,

Weydaarataan,

Weetaynayaa.

@SOMALIBOOKS

Maxaan wacdaraha adduunka,

U soo jiray waayaheeda,

Warkeeda la ii dhammeeyey,

Maxaa waran layla doonay,

Habeennimo layla waayey,

Nasiib kaga waabariistay,

[*Maxaa dabin lay wareejey:* Halkaraan]

Wadkayga la ii shirqoolay;

Maxaan dacar lay walaaqay,

Waabeeyo ku caafimaaday,

Maxaan webiyaal is-jiidhay[xxix]*,*

Dhexdooda ka waab samaystay;

Maxaan wacad layla qaatay,

Rumaystay Wallaahi beena,

Wanaag anigoo sameeyey,

Maxay wadhi ii dambeysey;

Waayeel dadow,

Inaan waalanahay,

Duni weer siddoo,

Weligeed dhintoo,

Wacadkiyo xadhkii,

Weydaarataan

Weetaynayaa.

@SOMALIBOOKS

"Allahayow nin daacad ah", Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi"

Tixdani waxay u duurxulaysaa xaalad riyo ah oo saadaalinaysa kadeedkii xukun xumada oo laga guulaystay, xorriyaddii oo la soo ceshaday, farxad lagu dabbaaldegayo iyo xoogaggii dulmiga iyo mugdiga oo lagu diganayo. Sifaaleyaalka dawo caafimaad iyo dadab dhaxanta laga galo waa xorriyadda lafteeda. Isla markii indhaha dillaacay ee wax arkaya iyo iftiinku waa xorriyada caqliga iyo garashada oo markan mayalka haya. Qaybta inanku heesta ka qaadanayo, wuxuu sheeganayaa dedaalka iyo hawlaha uu u soo galay guusha dadab-galka xorriyo. Inanta, iyada farxadda caawa waxaa kala mudan hawsha ay u baahan hanashada xorriyo. Waxay leedahay wadajir, karti iyo dedaal baa gobannimo daryeela oo ay ku xasishaa. Waa nabar uu Hadraawi marar badan ku soo noqnoqdo oo maansooyinkiisa laga helo. Tixdiisa *Gol-janno* ayaa u ah tusaale muuq dheer.

@SOMALIBOOKS

Inanka:

Jidhku wuxuu dubaaxshaa,

Damqadaa halbowluhu,

Xididdadu darrooraan,

Ama dhiigga daadshaan,

Afku hadalka daayaa,

Dibnihiisa haystaa,

Doqon kaa nasiib lihi,

Marka ay ku dooxdee,

Birta kaala daashee,

kuu celiso daabkee;

Waxay doodi furan tahay,

Ruux kuu darraan jirey,

Marka aad ku digatee,

Xaqu kuu dulleeyee:

Allahayow nin daacada,

Allahayow nin daalina,

Deeqdaada haw simin.,

Inanta:

Iyadoo la degayoo,

Carradii la duubiyo,

Degelkii la taagoo,

Dadku caafimaadoo,

Rabbigay daweeyoo,

Danbar laga waraabshaa,

Dedki layga qaadoo,

Dabku ii iftiimee,

Indhihii dillaacee,

Laga furay daboolkaa,

Dooggiyo barwaaqada,

Farxad daawanaayee,

Bal dayaay ayaamuhu,

Isku derejo maahee:

Allahayow nin daacada,

Allahayow nin daalina,

Deeqdaada haw simin.

Inanka

Deeqaay wanaageey,

@SOMALIBOOKS

Dawo caafimaadeey,

Hantidii dadkaygaay,

Dhaxalkii dirkaygaay,

Dhaxantiyo dabaylaha,

Dadab laga galaayey,

Dayax iyo cadceedeey,

Dabka lagu hirtaayeey,

Duco qaba ka xeel dheer,

Dabinkiyo mareegtee,

Diga-rogashadaadaa,

Degdeg laygu' keenoo,

Aniguba daraaddaa,

Waan soo dabbaashee:

Allahayow nin daacada,

Allahayow nin daalina,

Deeqdaada haw simin.

Inanta:

Dantu wada jir guudbay,

Dayac kaga fogaataa,

Karti iyo dadaal baa,

Gobannimo daryeelee,

Dadku wuxuu ka maalaa,

Kolba siduu u daajee,

@SOMALIBOOKS

Ma dabbaaldeggaygiyo,

Caawa dadab-galkaygaa,

Dumarkiyo carruuruhu,

Igu diirsadeenoo,

Indhihii dillaacaa,

Dooggiyo barwaaqadan,

Farxad daawanaayee,

Bal dayaay ayaamuhu,

Isku derejo maahee,

Allahayow nin daacada,

Allahayow nin daalina,

Deeqdaada how simin.

@SOMALIBOOKS

"Mudantii Haweenka", Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi"

Tixdani waa hees ay wiil iyo gabadhi darandoorriyaan. Waxay u taal jacayl, waxaa se gadaasha sheekada ka muuqanaya ujeeddada maansoyahanka ee ku saabsan hanashada xorriyada. Marka laga tago farxadda iyo dabbaaldegga, tixdani wax badan bay kala mid tahay tixda ka horraysa ee *Allahayow Nin Daacad ah*. Wiilku waxa uu u yaal qof kasta oo gobannimada jecel u na halgamay, inantu na xorriyada ama gobnnimada nin waliba rabo in uu mayalkeeda qabto. Iyadu xujadii su'aasheeda ayey la soo taagan tahay oo gobannimo, markanna waxay leedahay maxaad talo lagu meel maro haysaa? Madhaxeedu se waa maxay? Ammaan iyo hadal laabta maydha waa la daldali yaqaan; runi se waa mid oo waa waxqabad midho-dhal ah. Dulucdaas bay tixdu siddaa oo ay af-gobaadeed sarbeeban inoogu sheegaysaa. Waa farriin kooban oo qaab farshaxannimo aad u qurxoon u taalla.

@SOMALIBOOKS

Inanka:

Mudantii haweenkaay,

Marwadii la sheegee,

Dadku wada majeertaay,

Dumar lama maseeyee,

Muxibada kalgacalkaay;

Laanyahay magooshee,

Midhihiyo caleentiyo,

Manka lagu tallaalee,

Ubax lagu marriimee,

Qurux lagu mannaystaay;

Muddo aan yaraynbaan,

Kugu soo maqnaayoo,

Ma ogtahay habeennadan,

Sida mayayga rooboo,

Kolba maayad keenaad,

Ii muuqataayoo,

Muhashada jacaylkaan,

Hadba soo mirkacayaa.

Inanta:

Murti waa la dhuuxaa,

Marwo dumar dhammaantood,

Ninkii iga majeertow,

Dhegtu waxay maqlaysaa,

Hadal laabta maydhee,

Adigaa ku mahadlee,

Midigtaada deeqdaad,

Malab ii daraysaa;

Mudanow ha yeeshee,

Runta lagama maarmee,

Sheekada micneeyoo,

Mus duleedka dhaafoo,

Geedkii mullaax weyn,

Ugu maydhax diiroo,

@SOMALIBOOKS

Taad iila maqan tahay,

Madhaxeeda ii sheeg.

Inanka:

Milgaa hadalku leeyoo,

Ereygii muquuna ah,

Waa loo mashxaradaa,

Madadaalo beenaad,

Igu mayracaysaa;

Marti waa la sooraa,

Magan waa la bixiyaa,

Haw dhu'ran masuuggii,

Maahmaahdu sheegtoo,

Dhibta haygu madiyayn;

Muddo aan yaraynbaan,

Kugu soo maqnaayoo,

Ma ogtahay habeennadan,

Sida mayayga rooboo,

Kolba maayad keenaad,

Ii muuqataayoo,

Muhashada jacaylkaan,

@SOMALIBOOKS

Hadba soo mirkacayaa.

Inanta:

Mahuraan sokeeye ah,

Maganteeda weligeed,

Makas baa illowdee,

Laba kala maqnaatiyo,

Innagoo mataana ah,

Kala miyo haddaad tidhi,

Maye inan idhaahdaa,

Ii muuqan waydaye,

Maamulidda hawlaha,

Adna haygu madiyayn;

Mudanow ha yeeshee,

Runta lagama maarmee,

Sheekada micneeyoo,

Mus duleedka dhaafoo,

Geedkii mullaax weyn,

Uga maydhax diiroo,

Taad iila maqan tahay,

Madhaxeeda ii sheeg.

@SOMALIBOOKS

Heestii dhinnayd

Sida aynu soo sheegnay waxa jirta hees uu ku daray riwaayadda mar danbe Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye", oo jiritaankeeda uu xaqiijiyey Siciid Saalax Axmed. Heestaasi way innaga maqan tahay wali, lagumana darin buuggii suugaanta dugsiyada sare ee ay riwaayaddu kusoo baxday. Maqnaanashan laga yaabo in ay sidaa ku lunto heestani, waxa ay u tahay daliil cad in haddii aan la weeleyn suugaanta, lana qorin, ay halis ugu jirto in ay lunto. Haddii aad in uun ka hayso wacaal, fadlan noo soo sheeg.

@SOMALIBOOKS

Tixraac

1. Ahmed, A. J., *Daybreak is Near: Literature, Clans, the Nation-State in Somalia*. Asmara: The Red Sea Press, 1996.
2. Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi", Siciid Saalax Axmed, Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye", Muuse Cabdi Cilmi, *AQOON IYO AFGÀRAD: Sugaanta Fasalka Afraad ee Dugsiga Sare*. W.M.Q. Muqdishu, 1980.
3. Maxamuud Cabdi Ducaale, *Waraysiga Siciid Saalax Axmed ee barmaamijka Xusuus-Reeb ee ka baxay Horn Cable TV* - https://www.youtube.com/watch?v=jr44YlhXaHk].
4. R.T.D., *Sirta Ereyga: Barmaamij uu duubay Reedhiyowga iyo Teleefishanka Jabbuuti* - https://www.youtube.com/watch?v=ZiPXVd8kmJA.
5. Siciid Saalax Axmed, Yuusuf Cismaan Cabdille, Boodhari Maxammad Warsame, *Silsiladda Siinley*, (buug soo socda).
6. Susan J Hoben, "Language Issues and Education in Somalia". *Proceedings of the Third International Congress of Somali Studies*, ed. Annarita Puglielli. Roma: Pensiero Scientifico Editore, 1988.
7. Yuusuf Cusmaan Cabdille "Shaacir" iyo Xasan Maxamed Yuusuf, *Cajalad cod lagu duubay oo ku saabsan Siinley*. Waxa soo saaray Hoyga Ururinta Suugaanta ee Cumar Yare, Hargeysa *(ma sugna taariikhda la duubay)*.

@SOMALIBOOKS

Gundhigyada kor ku tilmaaman:

i Gorfayntani waxa ay ku salaysan tahay buugga Suugaanta Fasalka Afraad ee dugsiyada sare ee la daabacay 1980kii. Riwaayadda *Aqoon iyo Afgarad* markii lagu daray manhajka dugsiyada waxa la ga beddelay meelo, waxana la kala hormariyey muuqaallada qaarkood, sarbeebahana waa la furfuray si ardeyda loogu fududeeyo.

ii Muuse Axmed Saxar waxa uu qorey *"Waxay markii ugu horreysey, Aqoon iyo Afgarad, ku gacan saydhay habkii soo daalay ee looga bartay masraxa Soomaaliyeed, waxaanay curisay, baan odhan karaa, hab-masraxeedka cusub ee hadda neecawdiisii bilaabatay."* Eeg hordhaca buugga Suugaanta Fasalka Afraad ee dugsiyada sare.

iii Qorayaasha riwaayadda waxa magacyadooda loo kala horreysiiyey sida ay ugu saxeexan yihiin gogoldhigga buugga Suugaanta Fasalka Afraad ee dugsiyada sare. Maxamed Xaashi Dhamac waxa uu sannadkii 2012 ku geeriyooday magaalada Oslo, Norway. Muuse Cabdi Cilmi waxa uu sannadkii 2011 ku geeriyooday magaalada Hargeysa, Somaliland.

iv Siciid Saalax Axmed iyo Muuse Cabdi Cilmi waxa ay ahaayeen isku fasal, waxa ay ahaayeen dufcaddii ugu horreysay ee gasha Lafoole. Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye" waxa uu ahaa dufcaddii saddexaad ee ku soo biirta Lafoole. Isla xilligaas ayaa Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi" ku soo biirey Lafoole isaga oo ka mid ahaa macallimiin badan oo la doonayay in ay lix bilood oo tababar degdeg ah qaataan si ay u buuxiyaan baahida macallimiin ee dugsiyada sare iyo dhexeba [Dhagayso waraysiga Siciid Saalax Axmed ee barmaamijka *Xusuus-Reeb* ee ka baxay Horn Cable TV. Waxa soo saara Ducaale - https://www.youtube.com/watch?v=jr44YlhXaHk].

v Dhagayso waraysiga Siciid Saalax Axmed ee barmaamijka Xusuus-Reeb ee ka baxay Horn Cable TV. Waxa soo saara Maxamuud Cabdi Ducaale – https://www.youtube.com/watch?v=jr44YlhXaHk.

vi Dabayaaqadii lixdamaadkii iyo horraantii toddobaatameeyadu waa mar ay Afrika ka soo baxeen dhaqdhaqaaq daba socda gumaysidiidkii tobankii sannadood ee ka horreeya (dabayaaqadii kontomeeyada), dhaqdhaqaaqaasi waxa uu qabay fikir ah in gumeysigu kaga tagay maamullada dunida saddexaad hoggaamiyeyaal u adeegaya gumaysiga oo fikirkiisa fulinaya. Waxana ay ku doodayeen in Afrika lagu hago xal Afrikaan. Waxa ka mid ahaa Kenneth Kaunda (Saambiya), Kwame Nkrumah (Ghana) iyo Julius Nyerere (Tansaaniya). Soomaalida waxa maanso ku cabbiray dhaqdhaqaaqaa Axmed Ismaaciil Diiriye "Qaasim", 1964, markii uu lahaa *"Isma doorin gaalkaan direy iyo daarta kii galay e; Dusha midabka Soomaali baad dugulka mooddaayee; Misna laguma diirsade qalbigu waa dirkii Karal e"*.

vii Ingiriisidu waxa ay mar kasta ahayd afka dawladda. Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed na waxa markiiba lagu bilaabay laba kulliyadood oo kala ahaa Sharciyada iyo Dhaqaalaha waxana kala hagaayay laba jaamacadood oo Talyaani ah, waxana wax lagu dhigi jirey Af Talyaani.

viii Xarunta Tababarka Macallimiinta (National Teacher Training Center – NTEC) waxa maalgeliyey Maraykanka isaga oo soo marinaya caawimadiisa USAID. Waxana hirgeliyey Jaamacadda Eastern Michigan University.

ix ALECSO (Arab League Educational Cultural and Scientific Organization) oo markaa ay maalgalinta ugu badan bixinayeen waddamada Gacanka Carbeed waxay ay bilaabeen dardar cusub oo lagu fidinayo wax ku dhigista Afka Carabiga, waxana ay dawladdii Jamhuuriyadda Soomaaliya u fidiyeen caawimo, kana heleen oggolaansho in lagu daro barmaamijka Carabaynta kan muqarrarka guud ee waxbarashada dalka.

x In Soomaalida oo la yidhaahdo waa dalalka dhifta ah ee af kaliya guud ahaan laga hadlo, haddana siyaasadda afka ee habka waxbarasho waxay mar kasta ahayd mashaakil. Carabiga, Ingiriisida iyo Talyaanigu waxay xidid kala kaan ah ku lahaayeen xilliyadii gumaysiga. Carabiga waxa u sii dheer diinta iyo Qur'aanka oo ku dhigan. Eeg waraaqda "Language Issues and Education in Somalia", Susan J Hoben.

xi Siinley waa silsilad maanso ka bilaabantay heesta "Ninka soo socdow joog" ee uu tiriyey Cabdi Aadan Xayd "Qays" oo uu ugu jawaabayay heesta *"Waan soo socdaa kow dheh"* ama *"Saxarlaay ha fududaan"* ee Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi" tiriyey, kuna jirtey riwaayaddan *Aqoon iyo Afgarad*. Waxa uu ka soo jawaabay Cabdi Aadan Xayd "Qays" markaa isagoo Jabbuuti ku sugnaa. Silsiladdan oo lagu tilmaamo kuwa ugu caansan midkood, waxa ka qayb galay in ta la hubo 15 maansoyahan, waxana ay tiriyeen 29 maanso, ka hor markii ay dawladdii Maxamed Siyaad Barre cidhiidhi ku saartey in ay joogsato. Eeg Ahmed, A. J. (1996), Daybreak is Near: Literature, Clans, the Nation - State in Somalia iyo qoraalka soo socda ee Siciid Saalax Axmed iyo Yuusuf Cabdille Cusmaan "Shaacir" ee la yidhaahdo "Silsiladda Siinley".

xii Cabdi Aadan Xayd "Cabdi Qays" waa maansoyahan ay dood wadaag badan lahaayeen kooxda riwaayadda alliftey oo suugaantiisu hormuud ka ahayd kacdoonkii fikirka ee lagaga soo horjeeday xukunka Maxamed Siyaad Barre, waxana uu arrinkaa ku muteystay xadhig dheer iyo jidh dil. Silsiladda Siinley waxa ay ka bilaabantay markuu Cabdi Qays ka jawaabay "Saxarlaay ha fududaan".

xiii Sida ku cad codka ay duubeen Xasan Maxamed Yuusuf iyo Yuusuf Cismaan Cabdille, waxa silsiladdan ka qayb

©SOMALIBOOKS

galay Cabdi Aadan Xayd “Qays”, Maxamed Ibraahin Warsame “Hadraawi”, Cali Saleebaan Maxamed “Ina Saleebaan Bidde”, Xaaji Aadan Axed “Afqallooc”, Maxamed Xaashi Dhamac “Gaarriye”, Siciid Saalax Axmed, Maxamed Cabdillaahi “Riiraash”, Yuusuf Jaamac “Canfar”, Axmed Maxamuud, Maxamed Siciid Cismaan “Waydaar”, Xasan Cilmi, Ibraahin Aw Saleebaan “Gadhle” iyo inantii kaliya ahayd ee ka qayb gashay, Caasha Jaamac Diiriye. Waxa kale oo la soo weriyey in Faarax Abokor Khayrre "Faarax Askari" iyo Jaamac Cabdillaahi Shuuriye ay lahaayeen maansooyin ka mid noqdey Siinley.

xiv Marka aad u fiirsato midhaha maansoooyinka, waxa aad dareemaysaa in aanay qaarkood la socon riwaayadda. Waxa arrinkan sii xoojinaya qiraalka Siciid Saalax Axmed uu waraysiga *Xusuus-reeb* ku qirayo in heesta “Saxarlaay ha fududaan” ay ka horreysay riwaayadda oo ay ku jujuubeen meesha.

xv Bandhigga Caalamiga ah ee Buugaagta Hargeysa waa bandhig dhaqameed sannadle ah oo ka dhaca magaalada Hargeysa. Waxa aasaasay Jaamac Muuse Jaamac sannadkii 2008kii, waxana hirgaliya ururka Redsea Cultural Foundation. Bandhigga yoolkiisu waa dhiirrigelinta qoraalka iyo akhriska. Eeg www.hargeysabookfair.com.

xvi Siciid Saalax Axmed waxa uu bare noqdey markii u horreysey 1963, magaalooyinka uu wax ka soo dhigayna waxa ka mid ah Hargeysa, Cadaadaly, Burco, Beer, Muqdisho; Minneapolis (USA).

xvii Buugaagta Wareegta waa barmaamij ku sidkan Bandhigga Caalamiga ah ee Buugaagta Hargeysa oo sannadkiiba mar gobollada Somaliland oo dhan lagu soo maro si loo dhiirrigeliyo akhriska iyo qoraalka. Waxa uu bilaabmay 2011 isaga oo hordhac u ah Bandhigga Caalamiga ah ee Buugaagta Hargeysa.

xviii Siciid Saalax Axmed, Yuusuf Cismaan Cabdille, Boodhari Maxammad Warsame, Silsiladda Siinley, (soo socda).

xix Maxamed Muuse Saxar waxa uu ahaa markaa.... Waxa uu hordhac u sameeyey buugga riwaayadda.

xx Eeg hordhaca buugga Suugaanta Fasalka Afraad ee dugsiyada sare.

xxi Xogwaraysi Siciid Saalax Axmed i siiyey 1dii Diisember 2014 oo farriin e-mail ah isu waydaarsannay.

xxii Heesaha laba ka mid ah oo kaliya ayaa haddana ku jira buugga diiwaanka ee Maxamed Ibraahin Warsame “Hadraawi” laga qorey ee “Halkaraan”, daabacadda kowaad. Waa labada maanso ee “Saxarla” iyo “Wacdaraha Adduunka.” Heesaha kale oo dhammi waxa ay ku jiraan “Halkaraan” daabacadda labaad oo dhawaan soo bixi doona.

xxiii Heestan waxa la sheegay in ay tahay heestii ugu horreysay ee Maxamed Xaashi Dhamac “Gaarriye” allifey.

xxiv Dhagayso waraysiga Siciid Saalax Axmed ee barmaamijka Xusuus-Reeb, qaybta Afraad, daqiiqadda 11 e 45 sekan, ee ka baxay Horn Cable TV. Waxa soo saara Maxamuud Cabdi Ducaale – https://www.youtube.com/watch?v=jr44YlhXaHk.

xxv Indheergaradka laftiisa waxa ka dhexeeyey xafiiltan ku salaysan mabaadi'da hoggaanka waddanku qaatey ee ahayd Reer Bariga iyo Hantiwadaagga. Waxa Hadraawi lagu eedaynayay niyad xumaan iyo dabadhilif Reer Galbeed oo aan fikirka sinnaanshaha ee Bidixda la socon.

xxvi Eeg sadarrada “Ha saluugin qaybaha; Qalin baa saxeexee; Waxaan saatir kuu qorin: Ha u suul dhabaalayn; Kala saar run iyo been; Kala garo sir iyo caad”.

xxvii Rashiid Sheekh Cabdillaahi Axmed “Rashiid Gadhwayne” oo ah saaxiib markaaba aad ugu dhawaa Hadraawi, isla markaana dood wadaag la lahaa maansoyahannada, waxa uu yidhi: “Waxaa aad ii cajeb geliya quruxda heeshaha riwaayadda ku jira iyo sida ay uga soo go'ayaan dareenka dhalanka ah ee wanaag-doonka ah ee aanay saamaynin buugaag hantiwadaag iyo hantgoosi la soo khriyey.”

xxviii “Ammaantii kacaanka, soo dhawayntii kacaanka, hambalyadii kacaanka,” iwm ayuun bay ahayd wixii laga hadli jirey ee suugaanta oo dhan loo adeegsanayay ayuu yidhi Hadraawi. Sawaxankii iyo qayladii qolada dalka qabsatay dalka iska daaye, adduunka oo dhan gaadhay. Sidaas bay Siinley ku bilaabantay si ay wax ka duwan u sheegto.

xxix Buugga Halkaraan, daabacadda kowaad, waxa uu kala hormarinyaa tuducyada “Maxaan wacad layla qaatey, rumaystay wallaahi beena” iyo “Maxaan webiyaal is jiidhey, dhexdooda ka waabsamaystay”.

@SOMALIBOOKS